Waa maxay baaritaanka Pap test?

Pap test waa baaritaan lagu heli karo isbedelka ku dhaca makaanka afkiisa. In la daaweeyo isbedelada marka ay hor leeyihiin ayaa looga hortegi karaa kansarka. Baaritaanka Pap test waa lacag la'aan.

Waa maxay makaanka afkiisu?

Makaanka afkiisu waa afka qay bta hoose ee ilma geleenka, Ilmaha ayaa soomara makaanka afkiisa marka ay dhalanayaan.



Maxaa sababa isbedelada aan caadiga ahayn?

Human Papillomavirus, or HPV, waa cudurada galmada la isugu gudbiyo oo layaqaan kaasoo ku sababa isbedelo aan caadi ahayn makaanka haweenayda afkiisa. Mararka qaarkood isbedelada aan caadiga ahayn ee uu sababo HPV waxa ay noqon karaan Kansar. Baaritaanka Pap test ayaa lagu heli karaa isbedeladaas aan caadiga ahayn kahor intii aysan kansar isku bedelin.

Ma u baahanahay Pap tests?

Dhamaan Haweenka mar uun galmo ku firfircoonaa (galmo iyo taataabasho saaxiibtinimo) waa in ay si joogta ah isugu sameeyaan baaritaanka Pap tests.

Mudo intee le'eg ayaan ubaahanay in aan Pap test isku sameeyo?

Waa in aad bilawdaa in aad baaritaanka Pap tests is ku samayso markii ay da'daadu tahay 21 jir aadna sii wadaa baaritaanka 3dii sanaba mar illaa aad gaadho da'da 69 jir.

Waa maxay talaalka HPV?

Talaalka HPV waxa uu kaa difaacayaa noocyo ka mid ah HPV kasoo sababa kansarka ku dhaca makaanka afkiisa. Talaalku ma daweeyo jeermiska aad qabto ee HPV. Hadii aad is talaasho, waxa aad weli si joogta ah ugu baahnaan doonta baaritaanka Pap tests.

Xageen ka heli karaa Pap tests?

Weydii dhakhtarkaaga ama kalkaaliyaha, la xiriir xaruuntaada caafimaadka, ama eeg website keena: cancercare.mb.ca/screening.

Kansarka makaanka afkiisa ku dhaca badankiis waxaa looga hortegi karaa hadii haweenku ay baarintaanka Pap tests si joogta ah isugu sameeyaan iyo lasocodka isbedelada aan caadiga ahayn.

Wixii akhbaar dheeraad ah fadlan la xiriir:

CervixCheck, CancerCare Manitoba
#5-25 Sherbrook Street
Winnipeg, Manitoba R3C 2B1

Telefoonka: 204-788-8626
Telefoonka lacag la'aanta ah: 1-855-952-4325
CervixCheck@cancercare.mb.ca
cancercare.mb.ca/screening

CancerCare Manitoba
ActionCancerManitoba
BreastCheck CervixCheck ColonCheck